

Beegsiga fududeynta Xaddidaaddaha KOOFID-19 ayadoo la raacayo Tallaabada 2aad

Maarso 01, 2021

Alberta waxay si taxaddar leh ugu dhaqaaqi doontaa Tallaabada 2aad ee qaab dhismeedka afarta tallaabo ah si loo fududeeyo xannibaadaha iyadoo la adkeynayo tallaabooyinka adag ee lagu xadidayo faafidda KOOFID-19 ee Gobolka oo dhan.

Tallaabooyin caafimaad oo wax ku oolka oo la cusbooneysiiday ayaa loo diyaariyey goobaha jirdhiska gudaha iyo maktabadaha si loo fududeeyo cadaadsika saaran nidaamka caafimaadka isla markaana ka yaraato isbitaal dhigidda ay 450.

Saraakiisha caafimaadku waxay sii wadayaan inay si dhow ula socdaan faafidda cudurka KOOFID-19. Ayadoo jirta qiyaaso taxaddar leh, isbeddelada xayiraadaha hadda jira ee cayaaraha carruurta, iyo hoteelada, xafladaha, hoolalka bulshada iyo xarumaha shirarka dib ayaa loo dhigay illaa Tallaabada 3.

“Waxaan qaadaneynaa hab taxaddar leh, anagoo og in kiisaska socdo ee isbitaal dhigidda ay hoos u dhacday, laakiin khatarta KOOFID-19 weli waa mid jirta. Waad ku mahadsan yihiin shaqada adag ee reer Alberta qabteen usbuucyadii la soo dhaafay, waxaan horey u qaadeynaa tillaabadan aaminka ah. Reer Alberta waxay cadeeyeen awooda ay u leeyihiin inay isbedel sameeyaan, in aan sii wadno dadaalkeena si aan u sii wadno hoos u dhacay kiisaska si xaddidaadyo dheeraad ah looga fududeey waqtigan, sida ay dowladda Alberta u sii wadi doonto inay cadaadis saarto Ottawa si ay ula qabsato bixinta tallaalka.”

Jason Kenney, Gudoomiyaha

“Waan ku faraxsanahay inaan horumar sameyneyno iyadoo la hubinayo in nidaamkeenna caafimaad uu sii shaqeynayo oo aan siineyno reer Alberta daryeelka ay raadinayaan ayna u baahan yihiin. Waxaan sameyneynaa qaab joogto ah oo aan ku yareyno xayiraadaha si aan u ilaalino isbeddeladayada hoos u dhaca. Toddobaadyada soo socda, waa inaan dhammaanteen kaalinteena ka qaadannaa sidii aan midba midka kale nabad ugu ilaalin lahayn oo aan u sii wadno yareynta isbitaal dhigidda.

Tyler Shandro, Wasiirka Caafimaadka

“Waxaan sameynay horumar waana ka muhiimsan tahay sidii hore inaan sii wadno dadaalkeena wadajirka ah si aan ugu hogaansano talaabooyinka caafimaadka ugana hor tagno kiisaska inay koraan. Xulushooyinkeena maalinlaha ah ayaa muhiim ah waana inaan feejignaano oo aan sii wadno weji xirashada, ilaalinta kala fogaanshaha, iyo inaan guriga la joogno markaan xanuun dareenon.

Dr. Deena Hinshaw, Madaxa Caafimaadka

Waji xirashada gudaha iyo shuruudaha kala fogaanshaha ayaa sii jiri doona inta lagu guda jiro hanaankan tallaabada, illaa iyo xad xaddidaadyo ayaa wali la dhaqan galin doonaa dhammaan dhaqdhaqaaqyada ku jira tallaabo kasta.

Tilaabada 2: Qiyaasta isbitaal dhigista - 450 iyo hoos u dhaca

Maktabadaha

- Xarumahan hadda waa furi karaa laakiin waa inay ku xaddidaan tirada boqolkiiba 15 ee degganaanshaha lambarrada dabka, oo aysan ku jirin shaqaalaha.

Jimicsiga gudaha (wax isbeddel ah kuma leh jimicsiga dibadda):

- Ilaalo la'aanta yar ee jimicsiga qofka iyo kooxda ayaa hadda loo oggol yahay oo ballan keliya ah.
- Kala fogaanshaha oo seddexda mitir ah waa laga maarmaan inta udhaxeysa kaqeybgalayaasha, oo ay kujiraan tababarayaasha marwalba, iyo wajiga waa inay xirtaan markasta tababarayaasha iyo kuwa kaqeyb galaya howlaha.
- Dhammaan jirdhiska gudaha waa in la sii diiwaangeliyaa, looma oggola in la iska yimaado.
- Jimicsiga aan lagu badneyn waxaa ka mid ah culay qaadista, fasallada qoob ka ciyaarka hooseeya, yogada, fuulista meelaha sarsare ee gudaha, iyo sidoo kale isticmaalka qalabka orodka ee (treadmill), iyo qalabka la xiriira.
- Jimicsiga ay dadku ku badan yihiin, oo ay kujiraan orodka, wareejinta iyo tababbarka xoojinta jirka sare, ayaa sii wadaya in loo oggolaado tabar ku saleysan qof qof ama qoys iyo hal tababare.

Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan xayiraadaha hadda jira ayaa lagu sharraxay [alberta.ca](https://www.alberta.ca)

Go'aanka Talaabada 3 ayaa la sameyn doonaa kadib ugu yaraan seddex isbuuc oo qiimeyn ah si loo qiimeeyo faafitaanka KOOFID-19. Qiyaasaha ku saleysan kiisaska iyo koritaanka, oo ay ku jiraan kiisaska kaladuwan, ayaa la kormeerayaa waxaana sidoo kale loo isticmaali doonaa in lagu hago go'aan kasta oo ku saabsan baahida loo qabo in la joojiyo tillaabooyin dheeri ah ama suurtagal ah in la kordhiyo xaddidaadaha.

Dawladda Alberta waxay ka jawaabaysaa faafida KOOFID-19 iyadoo ilaalinaysa nolosha iyo habnololeedka iyada oo tillaabooyin sax ah loo marayo, joogtaynta ganacsiyada yaryar iyo ilaalinta nidaamka daryeelka caafimaadka ee Alberta.

Xog la xiriirta

- Waddad horay u socodka ([Path forward](#))

Warbaahinta kala Duwan

- Daawashada shirka warfaafinta ([Watch the news conference](#))

Weydiimaha warbaahinta

[Jerrica Goodwin](#)

587-988-3278

Xoghayaha Saxaafadda, Xafiiska Gudoomiyaha

Tom McMillan

780-422-4905

Xoghayaha Saxaafadda, Xafiiska Gudoomiyaha

Si aad u hesho ilaha la tarjumay ee dowladda, fadlan booqo: <https://www.alberta.ca/covid-19-translated-resources.aspx>.